# Golaha Wakiiladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### *Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 5aad fadhiyadii 17aad*

***Wakhtiga uu Furma: - 10:02*** AM
***Taariikhda: - Axad, 22 May 2023***

**Gudoonka: -** Md. Siciid Mire Faraax Giire

**Quraanka: -** Md. Sh. Siciid Sokeeye

Ajandaha Fadhiga:- Doodda Xeerka Wax-ka-Beddelka Maamulka Maaliyadda

Md. Siciid Mire Faarax Giire:- Mudanayaal, waxaan maanta bilaabaynaa doodda Xeerka Wax-ka-Beddelka Maamulka Maaliyadda.

Hadalka Md. Axmed Cabdi Ibraahim (Timo-Jilic) (28 daqiiqo, 55 ilbidhiqsi) Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Marka hore waxaan salaamayaa dhammaan Mudaneyaasha sharafta leh, sidoo kale waxaan halkan tacsi uga dirayaa Ciidanka Qaranka.

Waxaan ka hadli doonaa **mabaadi'da guud ee xeerkan**, kuwaas oo ah in xeerku ku dhisnaado **habraacyada ugu wanaagsan ee caalamiga ah**, gaar ahaan kuwa la xidhiidha kobcinta dhaqaalaha—midka dawladnimo, midka qaran, iyo midka bulsho—si loo helo horumar maaliyadeed iyo dhaqan-dhaqaale oo waara, isla markaana loo sugo arrimaha gudaha (*domestic*) iyo kuwa caalamiga ah (*international*).

Mabaadi'da guud waxa kale oo ka mid ah **nidaamyada hufan ee lagu sugo xasilloonida maaliyadeed (financial stability)**. Mararka qaarkood waxa kordha kharashaadka ciidamada iyo mushaharkooda, mar kalena waxa jira wax-soo-iibsi iyo lacagaha la bixiyo. Dal kasta oo wax laga soo iibsadaa waxa loo baahan yahay lacagtiisa. Dawladaha waaweyn waxa ay ku tartamaan adkaynta iyo faafinta lacagahooda, balse annaga waxa na khuseeya **danteenna, taladeenna, iyo arrinteenna gaarka ah**. Sidaa awgeed, dhaqaalaha dalku waa inuu ku dhisnaadaa aqoonteena, garashadeena, iyo duruufteena.

Labada arrimood ee ugu muhiimsan ee aan ka rabno xeerkan waa **hirgelinta siyaasadda dabagalka (Monitoring Policy)**. Marka dal ahaan wax la soo iibsanayo—ha noqoto dawlad ama ganacsato—waxaa loo baahan yahay lacag qalaad. Taasina waxa ay keentaa khasaare (*loss*) iyo hoos-u-dhac ku yimaadda qiimaha lacagta waddanka. Sidaa darteed, **Monitoring Policy-gu waa qodob muhiim ah** oo xeerkan uu waajib ku yahay inuu dhaqan geliyo.

Bangiyada dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay labaduba waa inay si wadajir ah ugu xidhnaadaan nidaamkaas dabagalka. Sidoo kale, arrimaha sarifka iyo dhaq-dhaqaaqa lacagaha ciidamada waa inay ka mid noqdaan nidaamkaas.

Arrin kale oo aad u muhiim ah waa **doorka Wasaaradda Qorshaynta**, oo looga baahan yahay in ay si cilmiyeed u qiimeyso wax kasta oo la soo iibsanayo ama la iibinayo, qiimihiisa, meesha laga fulinayo, iyo saameynta dhaqaale ee uu yeelanayo. Taasi waxay suurtogal noqonaysaa marka ay wada shaqeeyaan **saddex hay'adood oo qaran**, si xeerku u fududeeyo is-waafajintooda.

Xeerkan Maaliyaddu waa inuu sugaa hirgelinta **Nidaamka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Somaliland (Somaliland Financial Management Information System – SFMIS)**, kaas oo waafaqsan nidaamyada caalamiga ah, isla markaana ay ku wada xidhmaan dhammaan hay'adaha qaranka ee miisaaniyaddu khusayso. Lacag kasta oo miisaaniyadda ku qoran, ha noqoto wakaalad, hay'ad, ama bangi dawli ah, wax-soo-iibsiga lagu sameeyo waa inuu maraa nidaamkaas, isagoo ku xidhan internet-ka iyo xisaabaadka guud ee qaranka, si loo helo isla-xisaabtan hufan.

Annaga oo ah Golaha Wakiillada, gaar ahaan guddiyada dabagalka, waa inaan awood u yeelannaa inaan si fudud oo daah-furan u aragno xogta miisaaniyadda la ansixiyey, maaddaama ay tahay mid dijitaal ah oo hufan. Si kastaba ha ahaatee, waxa jira su'aalo badan oo weli taagan, maadaama guddiyada qaarkood aanu ka dhex jirin wada-shaqayn buuxda. Sidaa darteed, **guddiyada Goluhu waa inay si dhow u wada shaqeeyaan**, gaar ahaan Guddida Dhaqaalaha iyo Guddida Dabagalka, si aanay u iman is-khilaaf ku saabsan go'aamada ay isla gaadheen.

Xeerkan waxa kale oo muhiim ah inuu si dhab ah u xoojiyo **doorka Bangiga Dhexe**, maadaama uu ka shaqeeyo labada siyaasad ee waaweyn: **Monetary Policy** iyo **Fiscal Policy**. Bangigeennu waa inuu noqdaa mid lagu kalsoonaan karo, si muwaadin kasta oo lacag dibadda laga soo diro uu u hubiyo in uu heli karo xilliga uu doono—ha noqoto 6 bilood, 4 sano, ama 10 sano ka dib—maaddaama uu Bangigu yahay wajiga qaranka.

Sidoo kale, xeerku waa inuu kor u qaadaa **dakhliga dawladda**, gaar ahaan dhinaca cashuuraha. Dhulka, hantida, iyo khayraadka kale ee muwaadiniintu sheegtaan waa inay si caddaalad ah ugu biiraan dakhliga qaranka. Cashuur mitir-mitir ah oo lagu qaado dhulka, sida ku cad xeerkan, waxay gacan ka geysanaysaa kobcinta dhaqaalaha. Dawladda Dhexe waa inay cashuurahaas u qaybisaa gobollada iyo degmooyinka.

Ugu dambayn, xeerkan waa inuu xaqiijiyaa in muwaadiniinta danyarta ah, gaar ahaan kuwa ku nool xaafadaha saboolka ah, loo helo dhul iyo deegaan sharci ah oo ay ku noolaadaan, maadaama **dhulku yahay mid ka mid ah saddexda khayraad ee ugu muhiimsan ee aynu leenahay**:

1. **Khayraadka Dhulka (Land Resources)**

2. Khayraadka Aadanaha (Human Resources)
3. Khayraadka Maaliyadeed (Capital Resources)

**Xeerkeennu waa inuu taabtaa saddexda khayraad ee xaqiiqda ah ee dhabta ah.** Dhulka sababta aynu u taabanayno waxa ka mid ah ceshadka, maygaarka, buuraha ku fiday, iyo beeraha ku fiday intaba. Cashuurta waa in Qaranku waajibiyo, waana in cashuuraha barigu qaadaan. Xeerkan waa inuu u gogol-xaadhaa arrintaas, taasna ayaan ka hadlayaa.

Mas'aladda kale ee aan ku darayaa waxa weeye in xeerku ansixiyo **barnaamij maalgashi**, maaddaama maaliyaddu u baahan tahay kobcin. Arrinta maalgashigu ha u soo gasho sida ay doontaba ha u soo gashoo. Maalgashigu mar waa soo jiidasho, marna waa maalgashi caalami ah. Xildhibaano badan oo halkan fadhiya, odayaal iga aqoon badan, ayaa jooga, runtii-na si buuxda u dareemaya waxa aan ka hadlayo. Waxa laga yaabaa inay ii bogaan oo ay yidhaahdaan waa nin yar oo wax badan haya. Rag badan oo khubaro ah ayaa halkan fadhiya, aniguna aad baan ugu mahadnaqayaa, sidoo kale haween hooyooyin waaweyn oo khabiirro ah ayaa inala fadhiya.

Arrinta maalgashiga waxa aynu uga baahanahay in aynu ka hadalno xaqiiqada ah in dalkani leeyahay sibidh. Hore ayaynu u ogayn warshaddii jirtay, ragii ka soo shaqeeyeyna Golaha way ka mid yihiin, ragii Kuuriya u tegayna Golaha way ka mid yihiin, aqoontooduna way joogtaa. Golahani wuu buuxaa; kuwii xisaabin lahaa, kuwii qalabka xisaabta hayey, kuwii dawayn lahaa—dhammaantood waa fadhiyaan.

Golahani ma aha mid lagu habsaamo, mana aha mid kooram lagu barto, ee waa gole laga faa'iidaysan lahaa. Marka arrimaha maalgashiga la hadlayo, warshaddii sibidhku hore waxay u soo saari jirtay 900 kun oo tan oo sibidh ah, isla markaana tayo sare leh. Rag badan oo aqoon u leh way joogaan. Waxay dalkan u soo kordhinaysay in ka badan 80 milyan oo doolar sannadkii. Labadii iyo tobankii sano ee u dambeeyey waxa aynu soo iibsanay ku dhawaad 5 bilyan oo doolar oo sibidh ah. Maaliyadda maanta aynu ka hadlaynaana Ilaahay ayaa ina garansiiyey—mahaddiis—laakiin 5 bilyan oo aynu soo iibsanay, wax ka yar 30 milyan oo doolar ayay warshaddu ku kacaysaa. Xeerka maaliyaddu waa inuu si uun u taabtaa arrinta maalgashiga.

Qodob kale oo muhiim ah waa in sidaas oo kale loo dhaqaajiyo warshadaha maxalliga ah ee hadda jira. Aynu iska dayno hebel iyo hebel, waayo qaran baynu nahay. Waxaan aaminsanahay in arrinta si dhab ah loo wajahayo, lana dhaqaajiyo warshadihii jirey. Xildhibaano qiimo leh ayaa fadhiya. Waxaan leeyahay: dabciya arrinta, hana shaqeeyo istanbaarku.

Arrin kale oo muhiim ah: marka maalgashiga la taabto, mararka qaarkood waxa la yidhaahdaa mawduucii ayaa laga baxay. Laakiin marka maaliyadda laga hadlayo, wax kasta oo dhaqaale ah oo dalka wax u taraya, wax-soo-saarka kordhinaya, dhaqaalahana kicinaya, waa maaliyad, waana arrin aynu ka hadlayno.

Qodobka afraad waxa uu yahay **wax-soo-saarka cuntada**, kaas oo isaguna ka mid ah maalgashiga aynu samaynayno. Maalgashigu waa inuu yeeshaa akoon u gaar ah. Gurmadka qaranka wax baa la dhigaa. Sannadka 2024-ka, Golaha oo dhan waxaan u soo jeedinayaa in aynu isla meel dhigno in wax cayiman—ha noqoto 5%—loo qoondeeyo, xeerkanina markaas ha dhaqan geliyo.

Qodobka kale ee soo raacayaa waa **dhuxusha dhagaxa ah**. Buuro dhan ayaa laga soo saari karaa, sida sibidhka oo kale. Uma jeedo in boqol baabuur la siiyo, balse wax-soo-saar baan uga jeedaa. Dadka ku dadaalaya wax-soo-saarku waa qiimo qaran. Waxaa la soo saari karaa ilaa 400 milyan oo megawatt oo dhuxul-dhagax ah, boqol kun oo doolar ayaana ku kacaya, laba sano gudahoodna waa lagu dhamayn karaa. Aynu u dhaqaaqno arrintaas. Xeerka maaliyadda oo maanta inoo yaal, waxa uu awood u yeelan karaa in 30 kun oo dhalinyaro ah shaqo-abuur loo sameeyo. Dalka oo dhan nimco baa ka buuxda, xeerkanina ha noqdo mid si qoto dheer loo baaraan-dego.

Arrinta **solar-ka** aad ayaa loo dayacay. Anagoo ah guddida dabagalka iyo dhaqaalaha, gacanta ayaanu ku haynaa mashaariicdii SDF laga maalgeliyey. Waxa aynu doonaynaa warbixin cad oo ku saabsan mashaariicdaasi. Sidoo kale, mashruucii **wind-generator** ee garoonka diyaaradaha laga hirgeliyey, waa in laga keenaa warbixin sax ah: waxa la qabtay, waxa uu soo saaro, lacagta ku baxday, khasaaraha jira, sababtiisa, iyo haddii uu shaqaynayo ama u shaqayn waayey. Wind-generator-ku waa arrin muhiim ah.

Markaa maalgashiga waa in wax loogu qoondeeyaa, ugu yaraan 5% sannad kasta, lana dhigo akoon gaar ah si dalku u yeesho awood dhaqaale. Waxaanan u gudbayaa qodobada rasmiga ah.

**Qodobka 3aad: Ujeeddooyinka Xeerka**Waxaan ku darayaa farqad cusub oo u dhiganta: "In lagu dhawro kobaca dhaqaale ee bulshada." Marnaba waa inaanay iska hor iman dawlad iyo dadweyne. Iskahorimaad kasta ama xeer kasta oo fudayd leh waxa uu keeni karaa caqabado wada-shaqayneed ama amni. Isla Qodobkaas, xarafka "J", waxaan ku darayaa: "Hanti-dhawrka gudaha iyo nidaamka wada-shaqaynta Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka iyo Golaha Wakiillada." Guddida dabagalka, maaddaama ay Golaha ka mid tahay, waa in ay hawlaha u fududayso Golaha. Waa inaan la kala fogaannin Hanti-dhawrka Qaranka iyo Hanti-dhawrka Gudaha, si iskhilaaf looga ilaaliyo.

**Qodobka 7aad** waxa ka maqan hal farqad. Waxaan ku dari lahaa in Wasiirrada, Agaasimayaasha Guud, iyo Agaasimayaasha Maamulka ay Golaha u soo gudbiyaan qoondada miisaaniyadeed ee sannadkii hore. Ma naqaan xisaab ahaan inta shaqaale ah ee wasaarad walba ka shaqaysa, inta mushahar qaadata, inta mutadawacnimo u shaqaysa, iyo inta aan mushahar lahayn ee sannadka dambe u baahan. Arrimahaas waa inaan ogaannaa. Mas'uuliyiin baynu nahay, miisaaniyad baynu ansixinaa. Waa inaan ogaano liiska dhammaan shaqaalaha: macallimiin, dacasleyaal, darawallo, ilaalo—wax walba. Taasi waa daahfurnaan dhab ah. Markay arrintaasi hirgasho, waxaynu u dhowaanaynaa hufnaan, saxnaan, wada-shaqayn iyo isfaham ballaadhan.

Haddii aynu wax yar tabanno, waxa weeye in wasaarad walba laga rabo warbixin kooban (*short report*) oo ku saabsan:

1. Shaqaalaha
2. Kharashaadka maamulka (printer, shidaal, diris, caafimaad iwm)
3. Safarrada dibadda iyo mashaariicda lagu baxay

Warbixintaas oo kooban, qurux badan, oo summary ah ha la raaciyo xisaabaadka guud. Wasaarad kasta iyo mas'uul kasta oo lacag loo ansixiyey waa inuu bixiyaa xisaab-celin, si hadhow haddii muran dhaco loo helo faylal cad.

**Qodobka 10aad** waxa uu ka hadlayaa *decentralization* iyo *local government.* Marka la eego aqoonta caalamiga ah, saddex arrimood ayuu maraa:

1. **Power** – awoodda, iyo sida loo xoojinayo wada-shaqaynta
2. **Administrative** – nidaamka maamulka iyo xoghayeyaasha dagmooyinka
3. **Financial** – maaliyadda

Maaliyaddu kama madax-bannaana saddexdan. Mas'uuliyadda cidda wax loo qabanayo, sida loo qabanayo, waa inay caddahay. Haddii tuulo lacag loo qaado, waa in la dhagaystaa baahideeda: iskuul, caafimaad, waxbarasho. Codsigu waa inuu ka yimaaddaa labada dhinac. Xeerku waa inuu si cad u qeexaa sida saddexdan (power, admin, finance) u wada shaqaynayaan barnaamijka decentralization-ka, mana aha inay kala go'do.

**Qodobka 13aad – Farqaddiisa 5aad** Qodobkani waxa uu ka waramayaa marka dawladda ay **xaraashaynayso ama iibinayso agab**. Hase yeeshee, qodobkan waxa ku jirta soo-jeedin muhiim ah. Maanta dhammaanteen waxaynu marag ka nahay in garaash kasta iyo goob kasta oo aynu marto ay yaallaan gaadiid ay leedahay dawladda. Sidaas awgeed, anigu waxaan soo jeedinayaa, Mudane Guddoomiye iyo Mudanayaalba, in la inagu taageero in **farqadda shanaad noqoto mid si degdeg ah u dhaqan-gasha**.

Waxaan xukuumadda ka codsanaynaa in **la soo diiwaangeliyo dhammaan gaadiidka daadsan** ee ku jira wasaaradaha iyo hay'adaha kala duwan, kuwaas oo ku dhex daadsan hantida maaliyadda qaranka, lana geliyo **xaraash sharci ah**, si muwaadiniintu uga faa'iidaystaan wixii la xaraashi karo. Qarankuna maanta waxa uu ku jiraa duruufo adag, dawo iyo gurmadna wuu u baahan yahay. Sidaa awgeed, dakhliga ka soo baxa xaraashkaasi waa inuu ku daraa miisaaniyadda sannadka dambe ama lagu daboolaa baahiyo badan oo ay ka mid yihiin kuwo xitaa Golahan ka dhiman. Waxa lagama maarmaan ah in wasaaradihii hawshan u xil-saarnaa ay si dhab ah u fuliyaan. Aniguna waxaan hubaa in gaadiidkaasi ay ka badan yihiin intii la filayay, maaddaama aan anigu habeen walba agmaro.

**Qodobka 21aad – Soo-jeedin Farqad Cusub (Farqadda 7aad)** Waxaan soo jeedinayaa in lagu daro farqad 7aad, taas oo dhigaysa in **Guddida Dabagalka iyo Ilaalinta Hantida Qaranka** ay ku weheliso **laba xubnood oo si gaar ah uga socda Guddida Dhaqaalaha**. Qodobkan waxa ku jira ansixin gaar ah oo uu Guddida Dhaqaaluhu yeelanayo. Waxba kama qabbo haddii xubno kale oo Golaha ka mid ah lala ansixiyo ama guddi gaar ah la sameeyo.

Hanaan ahaan, Guddida Dhaqaaluhu waxa ay qaabilsan tahay **wixii soo xarooda iyo sida ay u soo xaroodaan**, halka Guddida Dabagalkuna ay qaabilsan tahay **sida wixii soo xarooda loo isticmaalay**. Sidaa darteed, waxaan u arkaa in wada-shaqayn dhab ah laga hirgelinayo meesha taalla. Inkasta oo ay arrimuhu ku lug leeyihiin nabadgelyo, baahiyaha bulshada, sharcinimada xeerarka, iyo arrimo kale oo badan, haddana qodobkani waa mid **muhiim ah oo lama huraan ah**, si Guddida Dabagalka iyo Ilaalinta Hantida Qaranku ay door muuqda uga qaadato.

Macnaheedu ma aha "annaga oo keliya ayaan nahay", balse waa in gole kasta uu ka mid noqdaa isla-xisaabtan iyo wada-shaqayn. Intaas ayaan ku soo koobayaa.

**Hadalka Guddoomiyaha – Md. Siciid Mire Faarax Giire** Aad iyo aad ayaan ugu mahadnaqayaa Mudane Axmed Cabdi. Mudanayaal, sida aad ka warhaysaan, xeerkan waa **xeer aad u muhiim ah**, waana xeer hore u jiray oo hadda lagu samaynayo wax-ka-beddel iyo kaabis. Meelaha ugu muhiimsan ee xeerku taabanayo waxa ka mid ah:

- Aasaaska kaydka dakhliga
- Dejinta nidaam cad oo hufnaan leh
- Qeexidda waajibaadka iyo shaqooyinka saraakiisha u xilsaaran maaraynta maaliyadda
- Hagaajinta nidaamka diyaarinta miisaaniyadda qaranka

Sidoo kale, waxa muhiim ah in dooda Mudaneyaasha lagu saleeyo meelaha wax-ka-beddelku ku dhacay xeerka. Aad iyo aad ayaad u mahadsan tihiin. Haddaba, dooda waxaan siinayaa:

**Md. Maxamed Xuseen Maydhane (04 daqiiqo, 23 ilbidhiqsi)** Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiye, waad mahadsan tahay. Mudanayaal, marka aynu ka hadlayno xeerkan maamulka maaliyadda, waxa jira **laba qodob oo aad u muhiim ah** oo aanay innaga seegin. Hore ayay inoo soo seegtay labadii sano ee aynu joogney, mana la inoo keenin.

1. Marka la gaadho bisha lixaad, Wasaaradda Maaliyaddu waa inay Golaha keentaa **laba dukumenti**: mid ka hadlaya **saadaasha dakhliga saddexda sano ee soo socota** iyo ilaha uu ka iman doono.

2. Dukumentiga labaadna waa inuu ka hadlaa **sida dakhligaas loo isticmaalayo saddexda sano ee soo socota**, iyadoo la raacayo xeerarka caalamiga ah ee la yaqaan.

Labadan dukumenti hore looma inoo keenin. Miisaaniyaddu waa inay inoo timaadaa bisha 10aad annagoo og saadaasha dakhliga iyo kharashka saddexda sano ee soo socota, si cadna loo kala saaro mashaariicda iyo kharashaadka caadiga ah.

Iminka, waxa aynu ku tiirsannahay xisaab-xidhyo hore oo la isticmaalay, kuwaas oo markaa la inoo soo gudbiyo. Waa in arrintan sharciyeyn lagu sameeyaa oo xeerka lagu daraa si aanay mar dambe inoo seegin. Haddii kale, mar walba miisaaniyad duudduuban ayaa la inoo keenayaa, innaguna si degdeg ah ayaan u ansixinaynaa.

Xeerkan waxa kale oo ku qoran saadaasha amaahda. Dhab ahaantii, dayn in la saadaaliyaa waa arrin khatar ah. Haddii baahi dayn timaaddo, waa in si cad loo qeexo, Golaha la horkeeno, Goluhuna ansixiyo, iyadoo la caddeeyo baahida keentay, halka lagu bixinayo, iyo sida loo bixinayo. Qodobkan waa in xeerka lagu caddeeyaa, maadaama dayn raad-raac la'aani ay muddo dheer ina haysatay.

**Md. Saleebaan Axmed Carab** (06 daqiiqo, 09 ilbidhiqsi) Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Shirguddoonka iyo Mudaneyaasha Golaha Wakiillada waan salaamayaa. Xeerkan ina horyaalla waa xeer weyn. Qoladii inoo wakiilka ahayd labadii sano ee aynu joogney ayaa ka shaqaysay, waana ku mahadsan yihiin.

Guud ahaan, maaliyaddu waa waxa dunida oo dhan lagu kala socdo. Waxay u baahan tahay taxaddar iyo feejignaan gaar ah. Dhaqaalaheennu waxa uu ku tiirsan yahay cashuuraha, waana laf-dhabarta dakhliga qaranka. Sidaas awgeed, dawladda waa inay yeelataa nidaam iyo xeerar cad oo daah-furan.

Si loo soo jiito maalgashi gudaha iyo dibadda, waa in la debciyaa cashuuraha. Marka dakhliga la doonayo in la kordhiyo, kordhintu kuma timaaddo culays, balse waxay ku timaaddaa fududayn iyo soo jiidasho. Waa in la daryeelaa suuqyada iyo kaabayaasha sida waddooyinka iyo kastamyada, si dakhligu u sii kordho.

Intaa waxa dheer dhiirigelinta macdanta, shidaalka, warshadaha wax-soo-saarka sida sibidhka iyo birta. Dalku wuu qani yahay, balse dhiirigelin iyo qorshe la'aan ayaa ka jirta. Haddii aynu doonayno in heerka dhaqaale kor loo qaado, waa in wasaarad kasta iyo hay'ad kasta oo wax-soo-saar ku lug leh ay u diyaar garowdaa.

**Md. Axmed Yuusuf Nuur (Guruje)** (03 daqiiqo, 43 ilbidhiqsi) Bismillaahi Raxmaani Raxiim. Mudane Guddoomiyaha Golaha Wakiillada, Mudanayaal iyo Marwooyin, marka hore assalaamu calaykum.

Waxaan doonayaa inaan bixiyo iftiin sharci ah oo kooban oo ku saabsan xeerkan ina horyaalla. Xeerkan waxa Golaha u soo gudbisay Wasaaradda Maaliyadda. Asal ahaan waa xeer jira oo hore Golayaasha uga soo baxay, Madaxweynaha-na saxeexay. Wasaaradda Maaliyaddu waxay soo jeedisay saddex qodob oo wax-ka-beddel ah (*amendments*), sida uu Dastuurku u oggol yahay.

Saddexdaas qodob, Goluhu xaq buu u leeyahay inuu diido, ku raaco, ama wax ka beddelo. Waxa kale oo aan xusuusinayaa markii aynu cusbayn ee aynu halkan nimid, xeerkii shaqaalaha ayaynu ku bilownay, laba qodob oo Guurtidu wax ka beddeshay ayaana jiray, annaguna si khaldan ayaan uga tallaabsanay, Madaxweynaha ayaana inoo soo celiyey. Maanta, Golaha oo laba sano maraya, in mar kale laynaga gar-helo ma aha.

Waxaan odhan lahaa **xeerkan yaynaan dilin**, sidoo kalena **wax-ka-beddelkii (amendment-kii) ay Wasaaraddu inaga soo dalbatayna yaynaan dilin**. Saddexdaas qodob uun halagu koobnaado.

Guddoomiyaha Cabdirisaaq waan kala hadlay, talo sharci ayaan ka siiyey. Waxaan ku idhi: *saddexdaa qodob baa inoo yaalla*, wixii ka badan ee aynu galnaana waa **mutarra-habow**, amarka Ilaahayna islamaannu garan. Xeerkan guddidii ku shaqada lahayd ayaa loo dhiibay, Wasaaradda Maaliyadduna muddadaas way maqnaayeen. Laba sano ayuu xeerkan socday, maantana lifaaq ayaa laynoo keenay oo ka kooban 70 qodob. Taasi micnaheedu waxa weeye in xeerkan **xeer kale lagu dhex sameeyey**, laguna dhex galay, arrintaasina **sharci ma aha**.

Anigu waxaan soo jeedinayaa, Mudane Guddoomiye, iyadoo la tixraacayo **codsigii (arjigii) xukuumaddu inoo soo gudbisay ee wax-ka-beddelka ahaa**, in aad **la-taliyeyaasha sharciga** u gudbiso, ka dibna **sida wixii laynooga soo dalbaday** oo keliya aynu u galno, annagoo isticmaalayna xaqa aynu u leenahay, **annaga oo aan xeerka oo dhan dhex-galgalin**.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ---------------------------------------------- | ------------------------------------ |